



Ururka Waxbarashada Farshaxanka ee Oregon waxa ay sharfeen saddex macallin oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS)

Macallimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay ku guuleysteen saddex jeer oo ka mid ah sagaalkii jeer ee la qabtay abaalmarintii sanadlaha ahayd ee ay bixiyaan Ururka Waxbarashada Farshaxanka ee Oregon.

Kelda van Patten waxa ay ku guuleysatay abbaalmarinta de Vinci Macallinka Farshaxanka Heerka Dugsiga Dhexe ee Sanadka. Abbaalmarintani waxaa leh macallimiinta fasalada 6aad ilaa 8aad iyada oo lagu abbaalmarinayo “guulaha aan caadiga ahayn ee ay gaareen iyo u addeegida gobolka ama muhiimada ay qaranka u leeyihiin.”

Liliana Greenberg waa barre Dugsiga Marysville K-8 waxayna ku guuleystay abbaalmarinta lagu karaameynayo Xirfada Addeega Muhiimka ah. Abbaalmarinta waxa ay u aqoonsaneysaa “guushan heerka sare ay gaareen, addeegayda iyo gacanta ay ka geysatay qeybtan waxbarashada farshaxanka.”

Sarah Brown waa barre Dugsiga Hoose ee Ainsworth, iyaduna waxay ku guuleysatay Abbaalmarinta Sanadka ee Macallinka Farshaxanka Cusub. Abbaalmarinta waa abbaalmarinta la siiyo macallimiinta farshaxanka PK-12 saddexdii sanno ee ugu horeeyey.

Abbaalmarinta Gobolku siinayey macallimiintii ku guuleysatay ee sanadkii sagaalaad waxaa lagu qabtay Dugsiga Sarre ee Wilsonville maalintii Sabtidii waqtigii la qabtay shirkii sanadlaha ahaa ee OAEA. Sanadkii 2016, Michael Simmons oo ah barre wax ka dhiga Dugsiga Hoose ee Buckman ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa wuxuu ku guuleystay abbaalmarinta ugu sareysa ee Barayaasha Farshaxanka Sanadka ee Oregon.

Ururka OAEA waa hay'ad aan macaash raadin oo tabaruca golaha macallimiinta farshaxanka Oregon. Ujeedadooda waxa ay ku faahfaahiyeen sidii ay uga shaqeyn lahaayeen “taageerista horumarinta iyo ballaarinta tayadda muuqaalka waxbarashada farshaxanka.”